

WARQADDII LABAAD EE RASUUL YOOXANAA

Runta Iyo Jacaylka

¹ Anigoo odayga ah waxaan salaamayaa marwada la doortay iyo carruurteeda aan runta ku jecelahay, keligayna ma ahaye, laakiin xataa waxaa jecel kuwa runta yaqaan oo dhan, ² runta inagu dhex jirta, weligeedna inagu dhex jiri doonta aawadeed. ³ Nimco iyo naxariis iyo nabad ka yimaada Ilaaha Aabbaha ah iyo Ciise Masiix oo ah Wiilka Aabbaha ayaa inala jiri doona xagga runta iyo jacaylka.

⁴ Aad baan ugu farxay markaan arkay carruurtaadii qaarkood oo runta ku socda, waana si daynu Aabbaha amar uga helnay. ⁵ Oo haatan waxaan kaa baryayaa, murwoy, sidii anigoo aan kuu soo qorayn amar cusub laakiinse kii aynu tan iyo bilowgii haysannay, kaasoo ah inaynu isjeclaanno. ⁶ Tanu waa jacayl inaynu amarradiisa ku soconno. Amarkiina waa kan, waana sidaad tan iyo bilowgii u maqli jirteen inaad ku socotaan. ⁷ Waayo, khaa'inno badan baa dunida u soo baxay, waana kuwa aan qiran in Ciise Masiix jidh ku yimid. Kaasu waa khaa'inka iyo ku Masiixa ka gees ah. ⁸ Iska jira si aydnaan u khasaarayn wixii aynu falnay, laakiinse si aad abaalgud dhan u hehsaan. ⁹ Mid kasta oo dhaafa oo aan cilmiga Masiixa ku sii socon, kaasu Ilaah ma leh; laakiin kii

cilmiga ku sii socdaa, Aabbaha iyo Wiilka labad-aba wuu leeyahay. ¹⁰ Haddii nin idiin yimaado oo uusan cilmigan idiin keenin, gurigiinna ha soo gelinina, hana salaamina, ¹¹ waayo, kii salaamaa, wuxuu ka qayb galaa shuqulladiisa sharka ah.

¹² In kastoo aan hayo wax badan oo aan idiin soo qoro, ma aan jeclayn inaan warqad iyo khad idiinku soo qoro; laakiinse waxaan rajaynayaa inaan idiin imaado oo aan afkayga idinkula hadlo, si ay farxaddiinnu u buuxsanto.

¹³ Carruurtii walaashaada la doortay way ku soo salaamayaan.

Kitaabka Quduuska Ah **The Holy Bible in the Somali language of Somalia,** **Adan Jim'ale Version**

copyright © 1979, 2008 Society for International Ministries -- Kenya

Language: Somali

Translation by: SIM International

Somali, Kitaablka Quduuska Ah

This translation, published by the SIM, was published in 2008.

. If you are interested in obtaining a printed copy, please contact the SIM at PO Box 72983, Nairobi, Kenya.

. This translation text is made available to you under the terms of the Creative Commons License: Attribution-Noncommercial-No Derivative Works. (<http://creativecommons.org/licenses/by-nc-nd/3.0/>) In addition, you have permission to port the text to different file formats, as long as you do not change any of the text or punctuation of the Bible.

You may share, copy, distribute, transmit, and extract portions or quotations from this work, provided that you include the above copyright information:

You must give Attribution to the work.

You do not sell this work for a profit.

You do not make any derivative works that change any of the actual words or punctuation of the Scriptures.

Permissions beyond the scope of this license may be available if you contact us with your request.

This translation is made available to you under the terms of the Creative Commons Attribution-Noncommercial-No Derivatives license 4.0.

You may share and redistribute this Bible translation or extracts from it in any format, provided that:

You include the above copyright and source information.

You do not sell this work for a profit.

You do not change any of the words or punctuation of the Scriptures.

Pictures included with Scriptures and other documents on this site are licensed just for use with those Scriptures and documents. For other uses, please contact the respective copyright owners.

2017-08-31

PDF generated using Haiola and XeLaTeX on 11 Nov 2022 from source files dated 29 Jan 2022

3ab4b284-9860-5955-80fb-586830f21756